FSNAU
Food Security and Nutrition Analysis Unit - Somalia
FEWS NET
FAMINE EARLY WARNING SYSTEMS NETWORK

# SOMALIA Post-*Gu* 2012 Food Security and Nutrition Outlook

August to December 2012

## Farriimaha Muhiimka ah

- 2.085 malyuun oo dad ah oo ku sugan Somaaliya ayay hadda cunto yari ku haysaa (Jaantuska 1). Waxay wajahayaan cunto yari ba'an waxaana lagu sifeeyay Dhibbane (IPC Wajiga 3) iyo Gargaar-doone (IPC Wajiga 4) ee heerarka sugnaan-la'aanta cuntada.


- 2.12 malyuun oo dad ah, ahna koror boqolkiiba labo qiyaastii la sameeyay Bishii 7aad, ayaa tilmaamaysa inay ku sii jirayaan Dhibbane (IPC Wajiga 3) iyo Gargaar-doone (IPC Wajiga 4) ee heerarka sugnaan-la'aanta cuntada ilaa iyo Bisha 12aad 2012.

- Ka dib markii muddo dheer oo roob la'aani dhacday xilligii Guga (Bilihii 4aad-6aad), cayayaanna dillacay iyo sababo kaleba, waxsoosaarka Guga 2012 ayaa si aad ah uga hoos maray celceliska waxsoosaarka ee xilliga Guga, taasoo aad usaamayn doonta deegaannada beer-iyo-xoolodhaqatada koonfurta Soomaaliya sida Baay, Bakool, Hiiraan, Gedo iyo Jubbooyinka.

- 236, 000 carruur ah hadda ku sugan nafaqo darro ba'an dalka oo dhan, hoos u dhac boqolkiiba 27 ah ayaa dhacday intii u dhexeysa Bilihii 1aad ilaa 6aad iyo 7aad. Isla muddadaa, heerka nafaqo darrida aad u ba'an loo yaqaan (SAM) ayaa hoos u dhacday boqolkiiba 42 (54,000 carruur ah) dalkoo dhan. Boqolkiiba 70 ee carrurta nafaqo darrada ba'ani hayso waxay ku noolyihiin koonfurta Soomaaliya.

- Waxqabad degdeg ah oo daboosha bahida jirta ayaa lagama maarmaan ah si looga hortago ka daridda sugnaanta cuntada ee dalka. Dejin-mashaariiceed lagu ilaalinayo habnololeedyada, kobcinta awoodda qoysaska saboolka ah iyo horumarinta fursad u helidda cuntada ayaa weli Soomaaliya muhiim ka ah. Baahida degdeg ah ayaa weli aad uga jirta koonfurta ee deegaannada beer-iyo-xoolodhaqatada iminka iyo inta waxsoosaarka xilliga Deyrta ee Bisha 1aad 2013.


**Jantuska 1.** Xaaladda hadda, Bisha 7aad 2012, IPC sugnaan laáanta cuntada ee daran




Source: *FSNAU*

For more information on the Integrated Food Security Phase Classification (IPC) household group scale, please see: www.fews.net/FoodInsecurityScale

## Jadwalka xilliyada iyo dhacdooyinka ba'an





Source: *FEWS NET Somalia*

EUROPEAN COMMISSION
UKaid from the Department for International Development
Sida
unicef
UNHCR The UN Refugee Agency
Swiss Agency for Development and Cooperation SDC
Cooperazione Italiana allo Sviluppo Ministero Affari Esteri
CHF SOMALIA
USAID FROM THE AMERICAN PEOPLE

**Xaaladda Waqtigan**

Waxaa dad qiyaastii 2.085 malyuun ah oo isugu jira reer-miyi iyo reer-magaal iyo barakacayaal ay hadda cunto yaraani ku haysaa Soomaaliya. Waxay tani muujinaysaa hoos u dhac dadka baahan oo boqolkiiba 17 ah marka la barbar dhigo qiyaastii la sameeyay lix bilood ka hor. Hoos u dhacaa dadka baahan ka sokow, wadarta guud ayaa ka mid ah halka ay dunida ugu badan yihiin baahanyaasha. Boqolkiiba 53.7 dadka cunto yaridu hayso ee deegaannada miyiga iyo magaalooyinka ayaa lagu sifeeyay Dhibbane (IPC Wajiga 3), boqolkiiba 7.9 waxaa lagu sifeeyay Gargaar-doone (IPC Wajiga 4), halka boqolkiiba 38.4 oo ah barakacayaal oo cunto yaraan ba'ani haysana lagu sifeeyay Dhibbane. Ilaa iyo Bisha 12aad, 2.12 malyuun oo dad ah la filayaa in cunto yaraani soo wajihi doonto (Jaantuska 2 iyo 11).

**Jantuska 2.** Natiijooyinka la saadaaliyay, xaaladda sida aadka ah loo filayo ee Bisha 8aad illaa 12aad 2012, IPC **sugnaan laáanta cuntada ee daran**




Soosaare: FSNAU

*Fadlan, eeg Jantuuska 11 oo ah qariiraddan oo la ballaariyey*

Wixii xog ah ee dheeriya ee ku xiran Sifeynta Wajiga Iskudhafka Sugnaanta Cuntada (IPC) ee cabirka koox qoyseedka, fadlan eeg: www.fews.net/foodInsecurityScale

Roobabkii Bilihii 4aad ilaa 6aad ee Guga waxay ahaayeen dhexdhexaad inta badan gobollada waqooyi iyo qaybo la mid ah gobollada Bartamaha (Jaantuska 5). Roobabku waxay ahaayeen teel-teel oo fudud inta badan Koonfurta iyo meelo ka mid ah gobollada Bartamaha. Wadarta guud ee roobabkii da'ay way ka hooseeyeen celceliska muddada-dheer. Dib u dhacaa iyo kala googo'naanta roobabkii Guga ee Bilahii 4aad ilaa 6aad awigeed, waxaa si lixaadleh hoos u dhacay waxsoosaarkii gallayda iyo masagada ee koonfurta Soomaaliya. Wadarta guud ee waxsoosaarka guga ee gallayda iyo masagada ee dalka ayaa si aad ah uga hooseeysa celceliska; waxaa lagu qiyaasay saddexda ugu hooseeysa waxsoosaarka firida Gu'yada tan iyo 1995. Koonfurta waxaa lagu qiyaasay in la beeray dhul 250,000 hektar (ha) ah, balse waxaa la awooday in la goostay in lagu qiyaasay boqolkiiba 48 dhulkii la beeray. Waqooyiga goosashada beeraha ee xilliga Guga iyo Karanta ayaa kubeegan Bisha 10aad, sida iminka lagu saadaalinayo, waxsoosaarka firida wuu ka sarreyn doonaa cecliska colaaddii ka dib (15-sano) iyo ceceliska 5-sano (Jaantuska 4). Soomaaliya, wadarta waxsoosarka sanadlaha ee isugeynta waxsoosaarkii Deyr 2011/2012 iyo Gugii udambeeyay ayaa lagu qiyaasaa in uu wax yar ka sarreeyo celceliska 15ka sano iyo shanta sano. Suuqyada iyo qoysaska qaarkood ayaa weli heysta badarkii la goostay Deyrtii 2011/2012. Maadaama roobabkii Guga ay ahaayeen kuwo aan ku fillayn xilli beereedkii dhulalka roob-waraabka, balse way wanaajiyeen daaqa iyo biyahaba dalka intiisa badan. Daaqii isasoo taray iyo helitaankii biyaha ee soo wanaagsanaaday ayaa si dhexdhexaad ah am aka sarreysa kobciyay naaxsanaanta xoolaha intooda badan habnololeedyada xoolodhaqatada. Meelaha oo dhami may ahayn kuwo daaqu uu soo wada baxay, dhowr meeloodna xoolahoodu weyd bay ahayeen uguna wacneyd helitaanka daaqa iyo biyaha oo liitay sida habnololeedyada xoolodhaqatada Gubanka iyo Deexda. Waxaa jiray dhulal yar-yar oo xaladdoda miyi ay liidato oo Waqooyiga iyo Koonfurtaba ah. DEegaannada intooda badani, helitaanka caanaha ee qoysaska waa ay soo wanaagsanaadeen ka dib markii arigii dhaleen Bilihii 3aad iyo 4aad 2012. Helitaanka caanaha l'oda ayaa soo kordhay ka dib markii ay l'odii dhashay Bilihii 7aad iyo 8aad. Sidoo kale, geelu wuxuu dhinaca koonfurta iyo bartamaha iyo meelo yaroo ka mid ah waqooyiga dhali doonaa Bilaha 11aad iyo 12aad. Dalka oo idil, xaaladda guurguurka xoolahaa ayaa iska caadi ah oo kala soconaya halkii ay daaqi jireen xilliga roobabka iyo xilliga xagaaga. Waxaase ka duwan, oo lagu warbixyay in xoolaha ka hayaamayaan xoolo dhqatada Gubanka ee gobolka Sanaag kun jeedaan oogada Sool iyo dooxada Nugaal godan ee gobolka Sool.


**Xaaladda Nafaqo ee Hadda**

Xaaladda nafaqo ee inta badan hab nololeedyada Soomaaliya waxay muujinaysaa koboc laga soo bilaabo bishii 12aad, 2011, taas oo loo aaneynayo hagaaga fursad helidda cuntada. Tani waxay sababtay hoos-u-dhaca tirada caruurta ku sugan xaalad nafaqo daro (323,000 caruur ah bishii 1aad, 2012 illaa 236,000 caruur ah bishii 7aad, 2012). Hagaaga xaaladda nafaqo iyo hoos-u-dhaca heerka dhimashada caruurta waxa inta badan sababay korodhka helitaanka caanaha iyo helidda gargaarka ee dhinaca qaybaha nafaqada, cunnada iyo caafimaadka. Imika, dib-u- milicsiga heerka dhimashada guud waxay ka hoosaysaa hal qof/10,000 qof maalintiiba taas oo ah heer la caqbali karo ama walaac leh.

Laga soo bilaabo bishii 1aa illaa bishii 7aad, xaaladda nafaqo ee hab nololeedka Goliska Bari waxay ka soo hagaagtay maxaladda Daran kuna sugan tahay hadda marxalad Ba'an. Xaaladda nafaqo ee hab nololeedka Xoolo-dhaqatada Kudaha Koonfureed ee Jubooyinka waxay ka soo kobocday marxaladda Aad-u-daraanta oo ay tahay hadda marxaladda Daraanta; marxaladan oo kale ayaa ka jirta qaybo ka mid ah waqooyiga gobolka Hiiraan (Jaantuska 3)

Hayeeshee, hab-nololeedka Goliska iyo Gubanka Galbeed, xaaladda nafaqo way ka sii dartay kuna sugan mid Aad-u-daraan, ahaydna mid Ba'an xilligii Deyrta, taas oo ay sababtay liidashada helidda canaaha iyo cunnooyinka kaleba. Isla xaaladdan nafaqo oo kale waxay ka jirtaa hab nololeedka dooxada Nugaal, halka xaalad nafaqo Daran ay ka jirto hab nololeedka Hawd ee gobolada Waqooyi Galbeed. Taxanayashaan xaalad nafaqeedyada waxa inta badan sababay cudurro dilaacay. Gaar ahaan hab nololeedka xoolo-dhaqatada dooxada Nugaal ee Burco iyo Caynaba, waxay cudur looga shakiyey jadeeco bilihii 4aad illaa 7aad, taas oo uga sii dartay xaaladda nafaqo. Dib-u-milicsiga heerka cudurada ee hab nololeedka xoolo-dhaqatada Hawd ee gobolada Waqooyi Galbeed way sareysaa taas oo si hufan u la jaan qaaday nafaqada daran. Xaaladda nafaqo ee hab nololeedyada reer miyiga gobolada Gedo, Bay iyo Bakool waxay guud ahaan tahay mid Aad-u-daran, taas oo ay sababtay arrimooyin is biirsaday sida helitaanka cuntada heer qoys, cudurro iyo liidashada hab xanaanaynta caruurta.

**Jantuska 3.** Xaaladda nafaqda hadda ee Bisha 8aad 2012 kuna saleysan sahankii bishii 6 aad iyo 7aad




*Soosaare: FSNAU*

Deegaanada magaalooyinka Waqooyiga, xaaladda nafaqo ee gobolada Sanaag iyo W. Galbeed wali waxay ku sii sugan tahay mid Walaac ah, halka marxalad Ba'an ay ka jirto gobolada kale, marka laga reebo gobolka Togdheer oo xaaladda nafaqo ka dartay oo ah hadda xaalad Ba'an, halkay ka ahayd mid Walaac ah xilligi Deyrta. Gobolka Galgaduud, xaaladda nafaqo ee hab nololeedka magaalo waa mid Aad-u-Daran. Xaaladda nafaqo ee magaalada Muqdisho way soo kabatay kuna jirta mid Ba'an hadda, halka ay bishii 1aad ka ahayd mid Aad-u-Daran. Barakacayaasha gobolada dhexe iyo waqooyi way nugul yihiin, laakiin xaaladooda nafaqo waxay ku sugan tahay marxaladaha Daran – Aad-u-Daran, marka laga reebo barakacayaasha Hargeysa oo ah qaar xaladoodu tahay mid Ba'an. Barakacayaasha gobolada koonfureed waxay ku sugan yihiin xaalad nafaqo oo Aad-u-Daran, halka kuwa Muqdisho ku sugan yihiin mid Ba'an. Hagaaga xaaladda nafaqo ee barakacayaasha magaalada Muqdisho waxa u sabab ah sareynta gargaarka hay'adah sanadkii hore.


**Natiijooyinka Dadka Reer Magaalka iyo Barakacayaasha**

Sahamadii sugnaanta cunno ee la qabtaya bilihii 6aad iyo 7aad ee 2012 ayaa muujiyay waxoogaa horumar ah oo ka dhacay magaalooyinka dalka. Hase yeeshee, 450,000 oo qof ayaa weli la daalaa dhacaya xaalado bani'aadminimo dhib badan. Xaaladaha hagaagay ayaa si ballaaran loogu aanaynayaa qiimaha maciishadda oo hoos u dhacday ka dib qiimaha cunnada maxalliga iyo kuwa la soo dhoofiyo oo hoos u dhacay intii u dhaxaysay bilihii 1aad ilaa 7aad. Is beddelkan ayaa saamayn wanaagsan ku yeeshay cunno helidda reer-magaalka sida aadka ah ugu tiirsan suuqyada, kuwaasoo inta badan aan fursad u haysan inay soo saaraan cunnadooda. Hase yeeshee, dagaallo ka sii socda gobollada Bakool iyo Jubbada Hoose ayaa carqaladeeyey hawlaha ganacsi iyo dhaqaale kuwaasoo sii adkeeyey xaaladda sugnaan ee cunno ee dadka reer-magaalka ah. Qiimaha dallagyada gudaha laga soo saaro iyo kuwa la soo dhoofsho sida sonkorta iyo saliidda cunnada lagu karsado ayaa kordhay 10 ilaa 17 boqolkiiba Bakool iyo 20 ilaa 25 boqolkiiba Gobolka Jubbada Hoose. Mushahaar hawl-maalmeedyada ee Bakool ayaa hoos u dhacay 25 ilaa 40 boqolkiiba intii u dhaxaysay bilihii 1aad ilaa 7aad. Hawlihii dekadda Kismaayo oo fursado shaqo siinaysay saboolka reer-magaalka ayaa hoos u dhacaysay ilaa bishii 1aad ee sanadka. Wakhtigan hadda la joogo, ilaha dakhli ee dadka ku nool magaalooyinka ayaa waxa ka mid ah hawlo ganacsi oo yar yar, shaqooyin aan sugnayn oo kooban iyo shaqooyin kale oo is-dabbaraad.

Taas waxa ka duwan, awoodda dadka saboolka ee magaalooyinka ay ku iibsadaan cunno ee goboallda koonfurta iyo baratamaha ayaa si aad ah u soo roonaaday taasoo uu qiimaha quutul daruuriga (CMB) uu hoos u dhacay 9 ilaa 17 boqolkiiba bilihii 1aad ilaa 7aad. Natiijadiina, awoodda wax iibsi ee saboolka magaalooyinka ee ku tiirsan shaqo maalmeedyo

aan sugnayn ilo dhaqaale ahaan ayaa xoogoobay. Intii lagu jiray bishii 7aad inta badan gobollada ayaa halkii mushaar-maalmeed lagu beddelan karayay 9 ilaa 16 kiilo-garaam (kg) oo firilayda dalka laga beero marka loo eego 7 ilaa 12 kg bishii 1aad ee 2012-ka. Isku beddelashada mushahaar hawl-maalmeed iyo firilayda ayaa u dhigmay 9 ilaa 11 kg gobollada waqooyiga galbeed halka ay u dhigmeen 5 ilaa 6 kg gobollada bartamaha iyo waqooyi galbeed.

**Jantuska 4.** Taxanaha waxsoosaarka dalagga ee xilliga Guga





*Soosaare: FSNAU*

Horumar wax ku ool ah oo dhanka sugnaanta cunnada ah ayaa laga arka gobolka Banaadir halkaasoo tirada dadka ay haysato cunno xumo, lagu ogaado cabbirka cunno isticmaalka (FCS) ay hoos uga dhacday 22 boqolkiiba bishii 12aad ee 2011 ayadoo gaartay 4 boqolkiiba oo keliya bishii 7aad ee 2012. Hase yeeshee, kharashka ku aaddan cunno iibsiga marka loo eego kharashaadka guud ee reer u isticmaalo ayaa muujisay koror, ayadoo uu ka kordhay 67 boqolkiiba bishii 12aad ee 2011 gaarayna 78 bishii 7aad ee 2012. Tani ayaa loo aanaynayaa xilliga sahanka la sameeyey oo ku aaday bishii Ramadaanka tasoo ay qoysasku guud ahaan ay kordhiyaan karashka ku baxa cuntada. Natiijooyinka sahamada ayaa muujiyay fursad u helidda ilaha dhaqaale oo kordhay. Gaar ahaan, intii u dhaxaysay bilihii 1aad ilaa 7aad ee 2012, qoysaska ku lug leh hawlaha ganacsi ee yar yar ayaa gaadhay 41 boqolkiiba halkii ay hore u ahayd 7 boqolkiiba ee tirada qoysaska reer magaalka ah. Sidoo kale shaqooyinka xirfadeed ayaa tirada qoysaska ka faa'ideysta gaadhay 27 boqolkiiba halka ay hore u ahayd 10 boqolkiiba. Tirada dadka hela xawaaladaha ayaa iyana labanlaabantay intii u dhaxaysay bilihii 1aad ilaa 7aad ee sanadka. Deegaamada barakacayaasha ayaa weli ku sugan xaalad u baahan Gurmad Bani'aadminimo (Heerka Darnaanta ee 4), sida ay ka muujisay tirada sarraysa ee barakacayaasha ay haysato cunno xumida (42 boqolkiiba oo ay haysato cunno xumi) iyo sidoo kale tirada dadka ku tiirsan isdabbaraadyo dhib badan iyo kuwo aad u ba'an (35 boqolkiiba ee qoysaska). Ilaha dakhli ee dadka barakacayaasha ayaa waxa ka mid ah xoogsi (64 boqolkiiba) iyo ganasiyo yar yar (14 boqolkiiba). In kastoo heerka nafaqo-darrida ee magaalada ay hoos ugu dhacday nafaqo darro guud (GAM) ee heerkeedu gaarsiisan yahay 9.6 boqolkiiba, ayaa tirada dhimashada guud (CDR) lagu qiyaasay 1.41 oo qof oo ka mid ah 10,000 ee qof ee walba. Ilaa siddeed boqolkiiba ee dadka barakacayaasha ayaa soo gaaray magalaada saddex bilood ka hor xilliga la sameeyey sahanka. In ku dhow saddex meelood laba meelood ee barakacayaasha dhowaan yimi ayaa waxa ay ka soo hayaameen gobollada Shabeellaha Hoose iyo Dhexe halka 22 boqolkiibana ay ka yimaadeen Baay. Inta kalena ay ka yimaadeen gobollo kale.

Xaaladda sugnaanta cunoo ee gobollada waqooyiga ayaa ahayd mid xasilloon. Culaysyada kharash ee qoysaska ayaa waxa yara fududeeyay hoo u dhac ku yimi qiimaha maciishadeed oo hoos u dhacay intii u dhaxaysay bilihiii 1aad ilaa 6aad ee 2012 (hoos u dhac gaaraya 3-8%), taasoo ay ka muuqatay hoos u dhaca kharakhka cunnada uu hoos uga dhacay 79 boqolkiba bishii 1aad e 2012 gaarayna 74 boqolkiiba bishii 6aad ee 2012. Heerarka isdabbaraad ee qoysaska ayaa u dhexeeyay heerar latifan ilaa kuwo dhexdhexaad ah ee dhamaan gobollada. Xaaladda nafaqo ee inta badan gobollada waqooyiga ayaa ah mid Daran, marka laga reebo gobolka Bari halkaasoo xaaladdu ay tahay mid Ba'an iyo gobollada Togdheer iyo Waqooyi Galbeed kuwaasoo heerarka nafaqadu ay tahay mid Dareen leh.

Goobaha barakacayaasha ee inta badan gobollada waqooyiga ayaa loo aqoonsaday inay ku sugan yihiin xaalad Bani'aadminimo (Wejiga 4aad ee IPC) waxana ka duwan kuwa ku nool Hargeysa oo lagu cabbiray inay ku sugan yihiin xaalad Ba'an (Wejiga 3aad ee IPC). Heerka nafaqadarrida guud (GAM) ee goobahan ayaa kala duwan kuwaasoo u dhexeeya 16.3 boqolkiiba ilaa 21.7 boqolkiiba. Inta badan dakhliga soo gala barakacayaasha ayaa loo isticmaala iibsiga cunnada (79 boqolkiiba ee kharashka guud). Ilaha dakhli ee ugu muhiimsan ee barakacayaasha ayaa waxa ka mid ah xoogsiga (55% boqolkiiba ee barakacayaasha) iyo meheradaha ganacsi ee yar yare (14 boqolkiiba barakacayaasha).

**Jaantuska 5.** Kala duwanaanta roobka ee xilliga Guga oo ah inta milliimitir (mm) oo roob ah, Bilihii 4aad illaa 6aad




*Soosaare: FSNAU*

**Sida loo badinayo in xaaladda sugnaanta cuntada ay noqon doonto Bilaha 8aad ilaa 12aad 2012**

**Xogta Waddanka oo Kooban**

Horumarkii tan iyo Bishii 12aad 2011 ka sokow, weli xaaladda sugnaanta cuntada ayaa weli kusii dambeysa meel halis ah. Natiijooyinkani ayay kasoo baxeen xogihii kasoo baxay baaritaankii ugu dambeeyay ee Guga 2012 dabadii ay sameeyeen Hayadda Sugnaanta Cuntad iyo Nafaqada (FSNAU), ooy maamusho Ururka Cuntada iyo Beeraha ee Qaramada Middobay (FAO) iyo Shabakadda Nidaamyada ka Diga Macaluusha (FEWS NET). Siday FSNAU iyo FEWS NET ku warbixanayaan, tiro lagu qiyaasay 2.12 Malyuun oo dad ah

ayaa weli ku sugan dhibaato cunto yari ah (IPC Wajiga 3 ama ka sii sarreysa) muddada u dhexeysa Bilaha 8aad ilaa 12aad 2012. Waxaa ka soo rayntani muhimmaddeeda loo xaglinayaa waxqabadkii gargaarka aan kala go’a lahayn ee laba-iyo-tobankii bilood ee u dambeeyay, heerarka kaydka cunto ee qoyska iyo suuqaba ooy ugu wacneyd waxsoosaarkii aadka u wanaagsanaa ee la goostay Deyrta Bishii 1aad 2012, helitaanka caanaha oo wanaagsanaaday iyo sicirrada xoolaha oo aad u sarreeya inta badan deegaannada xoolodhaqatada Soomaaliya. Meelaha sii liidanaya, waxa ugu weyn ee sababay sugnaan la’aanta cunto ayaa loo xaglinayaa inay tahay waxsoosaarkii Guga ee Bilihii 7aad iyo 8aad oo aad u hooseeyay (Jaantuska 4).

Saadaasha Bilaha 7aad ilaa 12aad 2012 ayaa lagu saleeyay mala-awaalladan heer qaran:

**Cimillada:**

- El Niño fudud ama dhexdhexaad ah ayaa loo badinayaa inay billaabato inta u dhexeysa Bisha 9aad iyo Bisha 12aad. Waxay middani keeni doontaa in la helo roobab Deyreed oo oo dhexdhexaad ah ama ka sarreeya Bilaha 10aad ilaa 12aad. Balse waxaa loo badinaynin in roobabka Deyrta ee Bilaha 10aad iyo 12aad aany isku si wada noqon baahsanaan iyo muddada uu da’ayoba oo macnaheedu tahay in roobabku ay ku kala duwanaan doonaan deegaannada beeralleyda roob-waraabka ah.
- Roobabka isa soo taray iyo heerarka webiga ee sarreeya ayaa loo badinayaa inay ka dhacaan daadad degaannada beer-xoolo dhaqatada iyo fatahaado deegaannada diisha webiga. Dooxada Jubba ayaa si gaar ah khatar ugu jirta in fatahaadi ka dhacdo. Fatahaaduhu waxay joojinayaan shaqooyinkii beeraha, hawlihii isgaarsiinta iyo ganacsiga.


**Beeraha:**

- Xaddi gooban oo wax-soo-saar ah ayaa laga helayaa deegaanada jiinka webiga ee gobolada Jubooyinka iyo Shabeelaha Hoose bisha 9aad-10aad, 2012. Mugga badarka la goosanayo waxa laga yaabaa in uu ka hooseeyo celceliska wax-soo-saarka badarka ka baxsan xilliga caadiga ah ee Gu’ga liidshada Xagaayada ee bilaha 7aad - 8aad awgeed. Wax-soo-saarkan lagama yaabo in uu daboolo wax-soo-saarkii Gu’ga marka loo eego celceliska shanta sano ama muddada dheer.
- Baahida loo qabo tacab-goosiga beeraha ayaa la filayaa inay noqoto mid caadiyah bilaha 9aad – 11aad ee xilliga Deyrta, hawl qabad beereedka loo baahan yahay awgeed sida dhul diyaarinta, falka/haramaha, iwm.
- Heerka musqaayadda tacab goosiga hawlaha beeraha waxa la filyaa in uu kordho bilaha 9aad – 11aad 2012, baahida loo qabo shaqaale beereed awgeed.

**Xoolaha:**

- Iyadoo lagu saleynayo heerka dhexdhexaadka ah ee dhalmada lo’da ee Bilaha 7aad iyo 8aad, helitaanka caanaha Lo’da waxaa guud ahaan la filayaa inuu hagaago Bisha 9aad. Iibka caanaha ayaa la filayaa inuu kordho, taasoo kordhin doonta daqliga qoyska.
- Maadaama rimayaga uu dhexhdexaad ahaa xilligii roobabka Guga, dhalmo dhedhexaad ah ayaa riyaha iyo idaha laga filayaa Bilaha 11aad iyo 12aad. Waxay middani kordhin doontaa helidda caanaha.
- Caanaha ay dadka ladan ku sadaqaysanayaan qoysaska saboolka ayaa la filayaa inay kordhaan laga bilaabo hadda isla markaana sii korodhaan xilliga helidda caanaha ay ugu sarreeyso.
- Maadaama riamayga lo’da ay liidatey waqtigii roobabkii Guga ee Bilihii 4aad illaa 6aad, waxaa la filayaa heerar sare oo rimaga lo’da ah xilliga roobabka ee Deyrta ee Bilaha 10aad illaa 12 aad.
- Geelu wuxuu dhali doonaa Bilaha 11aad iyo 12aad, marka lama filayo inuu rimo roobabka deyrta. Ka dib billowga roobka Deyrta ee bisha 10 aad, usoo hayaamid xilliyeedka xoolaha ee deegannadooda, waxaay hagaajin dontaa helitaanka caanaha ee qoyska.

**Jaantuska 6.** Moordida guduudan ee suuqa Baydhabo, Gobolka Bay, Bishii 1aad ee 2011- bisha 7aad 2012, Shilinka Soomaaliga **kiiladiiba**




*Soosaare: FSNAU*

- Sicirka xoolaha ee gebi ahaan waddanka ayaa siduu xilligu ahaa kordhi Bilaha 9aad iyo 10 aad dhoofka Xajka awigii, ka dibna hoos ayuu u dhici doonaa balse ma gaari doono heerarka hoose.

**Suuqyada iyo Ganacsiga:**

- Qiimaha firilayda dalka laga soo saaro ayaa kordhi doona ilaa iyo bisha 12aad oo ay ugu wacnaanayso koror xilliyeed aalaaba dhaca bilaha soo saarka beeraha uu yar yahay ee 10aad ilaa 12aad, soo-saarka Guga 2012 oo ka yar heerka celceliska, iyo hoos u dhac ku yimaada kaalmada cunno ee bani’aadminimo muddo lix bilood ah. Hase yeeshee, qiimaha ayaan u muuqan inay gaari doonaan kuwii ugu sarreeyey wixii ka dambeeyey 2011 (Jaantuska 6). Qiimayashaan ayaa kordhi doona bisha 11aad ka hore inta aan la gaarin cunista dalagyada xilliga hore soo baxa ee Deyrta bisha 12aad.
- Qiimaha cunnada caalamiga qamadida iyo sonkorta ee kordhaya ayaa laga dareemi doonaa suuqyada Soomaaliya dhexdeeda. Cunnada laga sameeyo qamadiga ayaa kordhay 63 boqolkiiba oo xaddiga cunnada beecmushtarka la soo

dhoofiyay saddexdii sano ee ugu dambeysay, waxayna sii ahaanayaan kuwo u muhiim ah cunnada ay Soomaalida cunto. Hase yeeshee, lama garanayo xaddiga cunnadaasi ee dib loogu dhoofiyo Itoobiya, Keenya, iyo Jabuuti.

- Shilinka Soomaaliga (SOS) ayaaa u muuqda mid in yar qiima yeesha marka loo eego lacagaha qalaad taasoo ay ugu wacan tahay dhaqaalaha magaalada Muqdisho oo sii kordhaya iyo maalgelinno dalka soo gelaya. Shilinka Soomaalilaan (SLSH) ayaan u muuqan mid uu aad u qiimo beelo maadaama soo gelidda lacagaha qalaad ee Dhulka laga isticmaalo Soomalilaan shilling ee gobollada Waqooyi Galbeed ay korodhay xilliga dhoofka xoolaha ee bilaha 9aad iyo 10aad ee ka horreeya xilliga Xajka.
- Qiimaha bariiska ee caalamiga ayaa u eg inay sii ahaan doono mid xasilloon, ayadoo qiimaha bariiska doofka ku yimaada ee Soomaaliya uu sidoo kale xasilloonaan doona.

**Kaalmada Bani'aaddminimo:**

- Sida laga soo xigtey Kooxda Sugnaanta Cuntada (KSC) ee Soomaaliya, qorshaha howgalkooda ee illaa Bisha 12aad, tirada kaalmada la qorsheeyey waa ay yaraan doontaa laga billaabo Bisha 10aad illaa 12aad. Helitaanka ama oolidda firida ayaa iyana is dhimi doonta taasoo loo sababeynayo isdhimida bixinta mucaawinada cuntada, waxayna cadaadis dheeri ah oo sicir koror ah saari doontaa sicirka quudka daruuriga ah.
- Gaarsiinta kaalmada bani'aadminimo ee gobollada Bartamaha iyo koofurta Soomaliya ayaa yaraan doonta laga bilaabo hadda illaa Bisha 12 aad iyadoo la filayo in nabadgalyo darrida iyo dagaalladu ay sii socdaan.
- Taageerada bani'aadminimo ee meelo ka mid ah Waqooyiga oo ka nabadsan hayadaha samafalkana ay gaari karaan ayaa laga yaabaa inay kordhaan.

**Nabadgelyo Darrida:**

- Colaadaha sokeeye ee koonfurta Somaaliya ayaa la filayaa inay kordhaan oo ay carqaladeeyaan hawlaha ganacsi iyo habnololeedyada Muqdisho iyo kuwa koonfurta Soomaaliya.
- Colaadaha ayaa laga yaabaa inay xaddidaan tijaarada isaga gudubta xuduudda dalka iyo Keenya iyo tan Itoobiya.

**Natiijooyinka Nafaqada**

Koonfurta, odoroska xaaladda nafaqo illaa Bisha 11aad waxa la filayaa inay sii ahaato mid Daran ama Aad-u-Daran. Arrimaha keenaya nafaqo darridan waxa ka mid ah hooseynta wax-soo-saarka beeraha xilliga Gu'ga 2012 ee Bilihii 7aad iyo 8aad iyo odoros xilliyeedka ah inuu shuban biyood dilaaco iyo wax loo malaynayo daacuun ee Bilaha 10aad iyo 11aad. Waqooyiga, waxa la filayaa in xaaladda nafaqo isbedelin dhammaan hab nololeedyada, marka laga reebo hab nololeedyada xoolodhaqatada Golis/Guban ee Galbeed iyo dooxada Nuugaal, oo la saadaalinayo inay hagaagto noqotana mid Daran. Hab nololeedka xoolodhaqatada Hawdka ee gobollada waqooyi galbeed, odoros ahaan xaaladda nafaqo way soo hagaagaysaa noqonaysaana mid Ba'an.

**Meelaha Daran ee Liita**

**Hab Nololeedka Xoolo Dhaqatada Xeebaha Guban ee Waqooyi Galbeed**

Roobkii Xeyska ee labadii xilli ee isku xigey ee Bilaha 12aad illaa 2aad ee tagey ayaan di'in. Roobabka Xaysk ee da'a inta u dhexeysa Bilaha 12aad iyo 2aad ayaa ah roobabka kaliya oo aay hesho meeshani. Roobabka oo aan di'in, oo ay wehliyaan heer kul sare oo joogta ah, oo iminka ka sareeya 46 darajo Sesiyas, ayaa sababay in ceel gacmeedyadii ay guraan, daaq iyo biyo xumi iyo masaafo dheer in lagu gaaro ceelasha Riiga ah. Masaafo u socoshada biyuhu wey korodhay, taasoo sababtay in heerka dhaqnaanta xooluhu aay si aad ah u xumaato kana liidata heerka dhexdhexaadka ah ( fiiri sawirka 8). Cudurro la xiriira abaarta ayaa la soo sheegay xilligii sahanka ee Bishii 7aad ee 2012, inkastoo dhimashada xoolaha aysan badneyn illaa iyo imminka. Daaqa iyo biyaha oo liita waxaay sababtay in Geela, Lo'da iyo ariga midna uusan rimin laga soo billaabo dabayaaqadii sandkii 2010 iyo horaantii sanadka 2011. Iyadoo dhalidda xooluhu aay aad u yareyd sanadkii tagey iyo rimayga oo xadidnaa, helitaanka caanaha aad ayuu u liitaa. Marka uu xilliga Jilaalka dheeraado, xoola dhaqtada xeebaha Gubanka waxaay sida badan u hayaaman meelaha deriska la ah ee Itoobiya iyo Jabuuti ama buuraleyda Goliska. Hase yeshee, roobabka oo liitey aagga Shiniile ee gobolka Somaalida Itoobiya iyo gobolka Cali Sabiix ee Jabuuti, Kala fursadda hayaanka xooluhu aad ayey u koobneyd.

**Jantuska 7.** Geel abaartu saameysay oo jooga meel ku dhow tuulada Cabdulqaadir ee degmada Lughaya



*Soosaare:: FEWS NET*

Qiimaha biyaha ayaa si aada u kordhey, waxaana la filayaa inuu qiimaha sii kordho inta laga gaarayo Bisha 11aad. In kastoo qiimaha xooluhu ay ka sarreeyaan heerka dhexdhexaadka

sida inta badan ee Soomaaliya ay yihiin, sabateyna in si uun ugu wanaagsanaadan Nidaamka isku Badalashada Ganacsiga (NBG) ee ku kala iibsiga xoolaha iyo firida, inta badanse xoola dhaqatada waxay haystaan xoolo aad u yar oo gatami kara. Qoysasaska saboolka ah daqligooda ugu weyn waa lacag xawaaladeed ooy usoo diraan xubno ka mid ah qoysaskooda oo u guureen Jabuuti si aay shaqo uga helaan. Waxa kaloo jira kaalmo aan isdaba jog aheyn kana imaaneysa Heyadaha gargaarka iyo dowladaha Jabuuti iyo Soomaaliland.


Isticmaalka cuntooyinka kala duwan ee qoysaska ayaa yaraatey. Helitaanka caanaha iyo isticmaalkooda ayaa gabaabsi noqdey iyo cuntooyinka la cuno oo kusoo koobmey firida, sonkor iyo saliidda oo kaliya. Deynta ay qabaan qoysaska saboolka ah ayaa kordhey 38 boqolkiiba laga soo bilaabo Bisha 7aad ee sanaka 2011 marka la barbar dhigo Bisha lamidka ah (7 aad) ee sanadkan 2012ka, tasoo aheyd celcelis ah 125 Doolar gaarteyna celcelis ah 200 Doolar qoyskiiba. Helitaanka deynta ayaa isna hoos u dhacay. Qiyaasta nafaqodarrada ayaa iyana xumaatey, taasoo aheyd mid culus bishii 1aad(Jannaayo 2012), gaarteyna Bishan 7aad ee isla sanadkan 2012 heer aad halis u ah iyadoo heerka Wadarta Nafaqodarrada Ba'an (WNB) ay iminka gaartey 21.7 boqolkiiba.

Haysashada xoolaha ee qoysaska saboolka ah ayaa aad hoos ugu dhacey. Bisha 7 aad, qoysaska habnololeedka xoolodhaqatada Gubanka ayay xoolo aad u babadni ka baxeen sanadkii tagey, islamarkaana xoolahooda ay aad uga hooseeyaan heerkii gundhigga u ahayd. Isla bisha 7aad, haynt geela ayaa iyana yaraatey. Qoysaska danyarta ah iyo degaankoodaba waxaa lagu sifeeyey heerka dhibbanaan(IPC wejiga 3aad).

Marka lagu daro odorosidda wadanka ee sare lagu qeexay, Saadaasha bisha 12aad ee, odorosidda soo socota ee hab nololeedka Guban ayaa la sameeyey:

- Roobabka karanta ee ka di'i doona buuraha Goliska Bisha 7aad illaa 9aad, waxey gaarsiin doonaan daadad yaran dooxooyinka xeebaha ee habnololeedka xoolodhaqatada Guban.
- Heerkulkan sare waa uu sii jiri doonaa. waxaayna ahaan doonaan kuwo ka sarreeya 46 darjo ee Selsiyas illaa laga gaaro Bisha 11aad, lakiin heerkulka hoos ayuu dhici doonaa Bilaha 12aad illaa 2aad ee ah xilliga roobabka Xayska ay da'ayaan.
- Qiimaha biyaha ayey aad suuro gal u tahay iney sii kordhaan illaa laga gaaro roobabka Xeyska ee Bisha 12aad.
- Xoolaha u haray qoysaska saboolka ah ma ahaan doonaan kuwo caafimaadkoodu u saamaxo inay u hayaamaan gobollada deriska la ah ee Itoobiya iyo Jabuuti kuwasoo xaaladdooda daaq iyo biyaba aay wanaagsantahay. Xoolo bandanna ma ahaan doonaan kuwo iibsami kara.
- Qoysasku waxay xoolahooda ka iibin doonaan in yar oo iibsami karta maadaam uu qiimahoodu hooseyn doono.
- Lama sadaalinayo in kaalmo ballaaran oo Bani'aadminimo oo dheeriya inay dhacdo inta u dhexeeysa Bisha 10aad iyo Bisha 11aad. Qorshaha Hadda ee kooxda sugnaanta cuntada ee Soomaaliya wuxuu muujinayaa oo kaliya in tiro yar ay wax gaadhsiinayaan.
- Waxsoosaarka caanaha ayaa ahaan doona mid aad u yar waaba haddii ay wax uun jiri doonaan inta u dhexeysa iminka illaa Bisha 12 aad.
- Xuduud uga tillaabidda shaqo ee deegaankan ayay u badan tahay inuu sii korodho. Xilliga hayaamidda iyo soo noqoshadaba, xadidda xoolaha laqalanayo way kordhi doontaa.

**Jaantuska 8.** Kala duwanaanshaha eMODIS ee Shaxda Kala-duwanaanshaha la Joogteystay ee Daaqa (ShKDJ), 1-10kii Bishii 7aad




*Soosaare*: USGS/*FEWS NET*

Xoolo iibin badan oo dhibku keenay ayaa la filayaa laga billaabo hadda illaa Bisha 12aad, lakiin daqliga ka imanayo iibka xoolaha waqtiga la joogo ee sanadkan waxuu ahaan doonaa mid ka hooseeya kan laga helo iibka xilliga caadiga ah. Qoysasku waxaay iibin karaan 2-3 neefoo ari ah illaa Bisha 12aad, laakiin daqliga laga helayo iibinta xoolaha wuu ka hooseyn doonaa tan caadiga ah. Iibka caanaha iyo subagga wuxuu ahaan doona mid aad uga hooseeya xilliga caadiga, maadaama inta badan xoolaha, xataa geelu lama maali doono. Halka lacagta leysu soo diro ay ahaan doonto isha dhaqaale ee ugu weyn oo muhiim ah, guud ahaan daqliga ka yimaada lacagta leysu soo diro hoos ayuu u dhici doonaa Bisha 12aad inkastoo shaqo u hayaamiddu aay korodhay. Ku looltanka shaqada ee dadka soo galootiga ah iyo kuwa degaanka ayaa yareyn doonta mushqaayadda maalinlaha ah ee shaqo. Heerka deynta ayaa la filaa inuu sii kordho, lakiin si tartiib ah, deyn siintu hoos ayey u dhici doontaa, iyadoo deyn bixiyayaashu aney rabi doonin iyo iney awoodinba iney sii siiyaan deyn dheeri ah qoysasak aay sii kordheyso awood la'aanta ay deynta dib ugu bixinayaan. Daqliga ka imanaya xoolaha, waxsoosaarka xoolaha, hayaanka shaqo ee yaraaday awigeed, waxaa yaraan doona waxyaalihii suuqa laga soo iibsanayay.

Marka laga tago kaalmada socota iyo xoogaaga daqliga ee laga helo lacagta leysu soo diro, qoysaska danyarta ah ma awoodan iney si buuxda u helaan baahidooda cunto. Hantida habnololeed oo sii baab'ada ayaa la filayaa, xoolo kaloo u dhinta cudurro iyo dhibaatooyin kale ayaa kordhi doona. Dhibanaan (IPC wejiga 3aad) ee heerka sugnaan la'aanta cuntada ayaa la saadaalinayaa iney ku sii jiri doonaan Bisha 12aad oo dhan, lakiin qeyb yar oo kamid ah qoysaska saboolka ah ee xoolodhaqatada ayay xaaladdoda ka sii dari doontaa oo geli doona Gurmad deg-deg ah (IPC wejiga 4) ee sugnaan la'aanta cuntada.

**Beer-xoolodhaqatada Koonfureed ee Gedo, Jubada dhexe iyo Jubada hoose**

Iyadoo loo sababeeynayo roobabka oo daahay, iskudarka roobka da'ay oo ka hooseeyey heer dhexdhexaad ah, dhulka la beeray

oo yar, iyo cayayaanka oo dalagga aad u waxyeeleeyey, beer-iyo-xoolodhaqatada gobolladan waxaay ku dhowaadeen inaanay wax dalag ah goosan xilliga Guga ee Bisha 7aad iyo 8aad. Xogta ka imanaysa deegaanka iyo tan dayx gacmeedkuba waxay xaqiijiyeen in dalag aad u yar la beeray sanadkan( Jantuska 7). Qiimaha firida dalka( Galley/Haruur) ayaa si aan xilliga waafaqsanayn u kordhay laga bilaabo Bisha 6 aad illaa 7 aad. Qiyaasta firida la goostay ee goboka Jubada hoose ayaa ah 18 boqolkiiba marka la bar bar dhigo celceliska (15sano) ee dagaalada ka dib.


Qiimaha biyaha ayaa kordhay 14 iyo 18 boqolkiiba dhulalka beer-iyo-xoolodhaqatada laga billaabo Bishii 6 aad 2011 illaa Bisha lamidka ah ee 2012, sababta ugu weynina ay tahay roobabkii liitey/yaraa oo aan dib uu buuxin warihii. Sikastaba ha ahaatee, beero-iyo-xoolodhaqtada aadka ugu tiirsan xoolaha waxey heleen caws iyo caleen, kaasoo nageeyay hayaankii xoolaha. Lo'da dhalmadeeda oo dhexdhexaad ah bilaha 7aad iyo 8aad ah darteed, helitaanka iyo adeegsiga caanaha ee qoysaska ayaa kordhay dhowrkii biood ee tegey. Tani waxay hagaajisey helitaanka mid ka mid ah ilaha ugu muhiimsan ee daqliga si ay suuqa uga iibsadaan cunto. Waxaa intaa wehliya, dhaqnaanta xoolaha oo ah heer dhex dhexaad ah ama ka sareysaba iyo heynta xoolaha ee qoysaska saboolka oo ay inyari ku korortay laga soo bilaabo Bishii 1aad.

Bisha 7aad 2012 sahankii nafaqodarrada oo aay sameeyeen heyadda FSNAU iyo weheliyeyaasheeda waxeey heleen in xaaladda nafaqada ay hagaagtey laga soo bilaabo daraasaadkii Deyrtii kal hore, laakiin heerka nafaqo darradu waxuu weli ku suganyahay xaalad aad halis u ah gobollada Jubbooyinka iyo Gedo. Habnololeedka beer-iyo-xoolodhaqatada ee gobollada Jubbooyinka, heerka Nafaqo-darrida Ba'an ee Caalamka (GAM) ayaa lagu qiyaasay inuu yahay 25.1 boqolkiiba(22.2-28.3).

Marka lagu daro odorosidda waddanka ee sare lagu qeexay, odorosyadan soo socda ayaa laga sameeyay habnololeedka beer-iyo-xoolodhaqatada gobollada Jubboyinka iyo Gedo :

- Roobabka Xagaaga ee Bilaha 7aad iyo 8aad ee gobollada Jubbada (Hoose/Dhexe)ayaa sii ahaan doon kuwo ka hooseeyo heerka caadiga

**Jaantuska 9:** Qiyaasta daqliga ee Bilaha 7aad illaa 12aad ee degmooyinka Baydhabo/Bardaale ee Gobolka Bay ee Habnololeedka beer-xoolodhaqatada Bay-Bakool ee Waxsoosaarkoodu xoogganayn




Xogta iyo Falanqaynta: FSNAU/FEWS NET
*Nakhshadda garaafka: Food Economy Group (FEG)*

- Gobollada Jubbada Hoose/Dhexe ayaa ganacsiga ugu khalkhal badan Soomaaliya iyadoo loo badinayo in fatahaad iyo colaad dhacaan.

El Nino ah fudeyd illaa dhexdhexaad ayaa la filayaa iney keento roobab dhexdhexaad ah ama ka badan Bilaha 10aad illaa 12aad ee roobka Deyrta, taasoo hagaajin doonta xaaladda daaqa, kordhin doonta biyaha islamarkaan sababi doona in beeraha laga goosto Deyrta waxsoosaar dhexdhexaad ah ama ka sarreeya Bilaha 1aad iyo 2aad. Iyadoo la filayo in mushqaayadda maalinlaha ah uu wanaagsanaado laga bilaabo Bisha 9aad illaa bisha 11aad, waxay daqliga shaqda inta badan ku iibsan doonaan cunto laga billaabo bisha 9aad illaa 12aad. Sidoo kale dhalmo dhexdhexaad ah ayaa la filayaa Bilaha 11aad iyo 12aad, sidaa darteed helitaanka caanaha iyo iibinta subagaba wey kordhi doonaan waqtigaa.
El Ninadu waxay u keeni doontaa roob dhulka roob-waraabka ah, waxayse u badan tahay iney u keento daada dhulalka ku dhow webiyada. Daadadku waxaay kala jari doonaan habsami u socodka ganacsiga iyo hawlaha kale kuwaasoo ku xiran Jidadka iyo habdhismeedkooda. Markasta oo socodka ganacsigu sii yaraado taasoo ka imaneysa, jidadka oo xun, daadadka iyo colaada oo sii socota gobolladan, waxey keeni doonta sicirka firida, saliidda, sonkorta iyo cuntooyinka kale oo korodha. Halka daqliga xoogsig ee qoysaska saboolka ah illaa iyo xad u hagaagi doono, kororka sicirka wuxuu xannibi doonaa in shaqo ku iibsiga galleyda xillagan sii hagaago.

Habnololeedka beer-xoolodhaqatada ee gobolka Gedo oo inta badan aad ugu tiirsan dhaqashada xoolaha marka loo eego beeraha, helitaanka caanaha iyo sicirka xoolaha oo kobcay awigeed ayaa qoysaska saboolka ah u suurto geliyey iney helaan cunto dheeri ah. Deegaannadan ayaa ka soo raynaya oo noqonaya mid Walaacsan (IPC Wajiga 2). Balse, deegaannada beer-xoolodhaqatada ee gobolka Gedo, in ka badan kala bar qooysaska saboolka ah ayaa weli ku sugan xaalad Dhibbanaan ah (IPC Wajiga 3). Deegaannada beer-xoolodhaqatada ee Jubbooyinka ee inta badan ku tiirsan beeraha marka loo eego xoolaha ayaa loo badinayaa in ganacsiga jahawareero colaad iyo fatahaadi awigeed waxayna ku sii jiri doonaan xaalad Dhibbanaan ah (IPC Wajiga 3) illaa Bisha 12aad.

**Deegaanada Beero-xoolo dhaqatada gobolada Baay iyo Bakkol**


Waxa-soo-saarkii beeraha ee xilliga Gu'ga 2012 aad ayuu uga hooseeyay celceliska wax-soo-saarka inta badan deegaanada beero-xoolo dhaqatada gobolada Baay iyo Bakool. Wax-soo-saarka hooseeya waxa sababay waxyeelada cayayaanka siiba jiriqaa iyo roob yarida muddadii taabo-galka bixidda dalagyada. Gobolka Baay, abuur-naq (inta badan gallay, sisin iyo digir) ayaa laga sameeyay hab nololeedka beero-xoolo dhaqatada caanka ku ah tabcashada mesagada markii ay roobabku soo cusboonaadeen todobaakii saddexaad ama afraad ee bishii 5aad 2012. Hayeeshee,roobab liita oo goos-goos ah ee bish 6aad 2012 way uga sii dareen ama hagaasiyeen bixitaankii dalagyada. Calaamado muujinaya haraad dheereed ayaa la arkay ama jiray sida isduubka caleemaha dalagga. Gobolka Bakool, mesagadu way haraaday intayna gaadhin heerka bixitaanka inta badan qaybaha galbeed ee gobolka. Liidashada iyo goos-goosnimada roobabka waxa dheer roob laa'an jirtay bishii 7aad oo dhan labada gobolba taas oo sababay in wax-soo-saarka xilliga Gu'ga uu aad uga hooseeyo celceliska wax-soo-saarka gobolka Bay (21 boqolkiiba celceliska 15 sano) iyo Bakool (39 boqolkiiba celceliska 15 sano).

Natiijada isku-dhafka falanqeynta hab daraasadeedka dhaqaale qoyseed (LIAS) ayaa loo isticmaalay hab nololeedka beero-xoolo dhaqatada gobolada Baay iyo Bakool. Mala awaalka heer qaran ee kor ku qeexan ka sakow, mala awaaladan xadiyeed ama qiyaaseed ayaa la sameeyay:

- Baaqashada ama bi'idda xilliga Xagaayada ee biliha 7aad – 9aad waxay meesha ka saartay helitaanka ama suurto galnimada goosashada dalagyada gadaal laga beeray ama xilliga caadiga ah ka baxsan.
- Qiimaha badarka dalka waxa uu ka saramarayaa 20 boqolkiiba qiimaha bisha 7aad muddada u dhexaysa 7aad – 12aad.
- Waxa la filayaa qiimaha sonkorta in uu ka saro maro 25 boqolkiiba qiimaha bisha 7aad 2012.
- Mugga caano maal waxa la filayaa in uu la mid ahaado ta sanadka xigashada.
- Warbixinta xilli daraasadeedka hay'adda Falayqeynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada (FSNAU) ee meesinka xoolaha (tirada xoolaha) ayaa la adeegsaday si looga qiyaas qaato tirada xoolaha iyo inta ka irmaanba ee heer qoys.
- Waxa la qiyaasay in aan sibedel ku imanaynin sarifka Shilin Soomaaliga iyo Doolarka Mareykanga.
- Heerka musqaayadda tacab goosiga hawlaha beeraha ayaa la filayaa inuu la mid noqdo kii bishii 11aad, 2011 ee dhinaca dhul diyaarinta iyo falka (harameynta) iyo kan bishii 1aad 2012 ee hawl goynta dalagyada. Helinta shaqaale waxa la filayaa inay la mid noqoto sanad xigashada.
- Qiimayaasha dhuxusha iyo xaabada waxa la filyaa inay la mid ahaadaan qiimayaasha biliha 7aad – 12aa, 2012.

Ku salaynta malmaleynta iyo hooseynta wax-soo-saarka xilliga Gu'ga 2012, qoysaska beero-xoolo dhaqatada waxay wajahayaan nusqaan ku timaada noloshooda iyo ilaalinta hab nololeedkooda (Jaantuska 9), gaar ahaan qaybta dambe ee muddada la odorosay ee bilaha 11aad iyo 12aad, 2012. Natiijooyinkani waxay saxaysaa ama rumeynaysaa natiijooyinka falaqeymaha kale ee ku meeleeyay ama ka yeelay deegaanada beero-xoolo dhaqatada inay ku suganaadaan xaalad dhib leh (Xiisad bani'aadaminimo) ee IPC Phase 3 laga soo bilaabo bishia 7aad illaa bisha 12aad, 2012 ee gobolada Baay iyo Bakool.

**Figure 10.** Cost of the minimum expenditure basket (CMB) in Banadir, January 2011-July 2012, Somali shilling (SOS) per month





*Soosaare: FSNAU*

**Magaalooyinka iyo Barakacayaasha**

Tirada dadka ku sugan xiisadaha cunno ayaa la oddorasayaa inay kordhi doonto 18 boqolkiiba bilaha 8aad ilaa 1aad ee 2012 ayaa gaari doonta 530,000 oo qof. Arrimaha ugu muhiimsan ee la aaminsan yahay inay ka dambeeyaan hoos u dhaca sugnaanta cunno ee magaalooyinka ayaa waxa ka mid ah koror la filayo inuu ku yimaado qiimaha cunnada kaasoo saamayn doona awoodda wax iibsi ee dadka reer-magaalka had iyo jeer ku tiirsan suuqyada. Kororka qiimaha cunto ayaa waxa inta badan waxa sababaya hoos u dhaca soosaarka dalag ee xilliga Guga iyo qiimaha cunnada ee adduunka oo kordhaya. Hawlaha ganacsi iyo dhaqaale ayaa laga yaabaa inay hoos u dhacaan ayna ugu wacanaanyaan xaaladda nabadgelyo ee gobollada koonfurta Soomaaliya oo u muuqata inay sii xumaanayso. Marka la eego adeegyada waddooyinka oo liita, roobabka (El Nino) xaddigoodu badan yahay ee la saadaalinayo inay da'aan bilaha 10aad ilaa 12aad ee Deyr-ta 2012 ayaa waxa la filayaa inay kordhaan oo ay sababaan daadan, kuwaasoo saamaynaya dhaqdhaqaaqyada ganacsi ee dalka gudihiisa ah. Hoos u dhaca ayaa saamayn karaya helidda cunnada taasoo khasbaysa inuu kordho qiimaha cunnada. Koror qiimaha firilayda ee dalka laga beero oo gaaraya 3 ilaa 13 booqolkiba intii u dhaxaysay bilihii 6aad iyo 7aad ayaaba hore looga arkay suuqyo badan oo muhiim ah oo ku yaalla dalka gudihiisa. Isbaddalka qiimaha cunnada ee caalmai ayaa sidoo kale culays hor leh saari doona awoodda cunno iibsi ee dadka ku dhaqan magaalooyinka kaasoo qaata inta badan kharashaadka (u dhigma 70% kharashaadka). Qiimaha sonkorta ayaa gaar ahaan u muuqata inay gaarto heer aad u sarreeya dhowrka bilood soo socda. Hase yeeshee, qiimaha ayaan la filaynin inuu gaaro heerarkii aadka u sarreeyey laga soo billaabo 2011 maadaama qiimaha nololeed (CMB) ee haatan oo si aad ah u hooseeya marka la barbar dhigo sanadkii hore (ee jaantuska 10aad), iyo qiimaha qaar ka mid ah cunnada la soo dhoofiyo sida bariiska oo laga yaabo inuu ahaado mid deggan.

Xaaladaha nabadgelyo ee gobollada koonfurta iyo bartamaha oo sii xumaanaya ayaa u horseedaya koror tirada dadka barakacayaasha ah. Xasillooni darida ayaa sidoo kale carqaladaynaysa hab-nololeedyada dadka. Tirada dadka ku sugan xasaraadaha sugnaanta cunno ayaa la odorasayaa inay korodho 18 boqolkiiba laga billaabo bisha 7aad taasoo gaari doonta 530,00 oo qof inta u dhaxaysa bilaha 7aad ilaa 12aad.

**Figure 11.** Projected Outcomes, most likely scenario, August to December 2012, IPC acute food insecurity




Source: FSNAU

*FEWS NET is a USAID-funded activity. The authors' views expressed in this publication do not necessarily reflect the view of the United States Agency for International Development or the United States Government.*